


مع فضيلة الشيخ



حفظه الله



Bismillaahi Ar-raxmaani Ar-raxiim

(Mu'assasada Warbaahinta Al-Qaabiduuna Calal-jamar waxay mahad celin iyo qadarin ujeedineysaa walaalahooda Mu'assasada Warbaahinta Labeik, kukaalmeenta ay kukaalmeeyeen dhinaca Tarjamada, waxaana Allaah ugu baryeenaa walaalaha inuu waafajiyo waxii kheer iyo raali ahaanshaha Allaah uu kujiro)

Jawaabaha kulankii Furnaa ee Mu'sasada Al-Qaabiduun ay la yeelatay

Sheekh Abuu Hammaam Bakar ibn Cabdulcaziiz Al-athari

Xafidahullaah

Bismillaahi Ar-raxmaani Ar-raxiim

Ka Jawaabida Su'aalihii Shabakada Sanaam Al islaam

Mahad oo dhan waxa ay u sugnaatay allihii yiri (**وَفَوْقَ كُلِّ ذِي عِلْمٍ عَلِيمٌ**) naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaato nabiga, ehelkiisa, saxaabadiisa iyo intii raacday wadada saxda ah, intaas ka dib.

Qaar ka mid ah walaalaha shabakada sanaam al-islaam ayaa waxa ay iigu waceen inaan kulan la yeesho xubnaha shabakada, waana ka aqbalay midaas, arrinkaasna ehel uma ihi waxaanse sidaa u yeelay inaan farax geliyo geesiyaasha islaamka iyo taageerayaasha mujaahidiinta.

Kadib su'aalihii la I waydiinayay waala jamciyay waana la iisoo diray, waan habeeyay waana kala saarsaaray, waxaana kasoo reebay intii cilmi iyo nacfi leh, waxaan kaloo ka reebay su'aalaha shakhsiyadeyda ku saabsan iyo kuwa soo noqnoqday ama isku macnaha ah.

Qofkii aan arkin su'aashiisii ha ii cudur daaro isagoo eegaya maslaxada guud. Alle waa waliga u saaxiibkaa waafajinta kheyrka.

Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato nabigeena muxammad, ehelkiisa iyo saxaabadiisa dhammaantood.

Waxaa qoray Abuu Hammaam Al-athari

1433 - 2012

::

Su;aasha Koowaad: ka socoto abii dujaana almaqdisi: allaha ku karaameeyo sheekheena faadilka ahoow

Su'aasha koowaad: booliska Xamaas ma gaalo baa?

Su'aasha labaad: waa maxay mowqifkiina ku aadan jamaacaatka jihaadiga ee ka jira Ghaza, waa maxayse jamaacada aan ku talineysid in lagu biiro?

Jawaab:

Allaha ku karaameeyo abaa dujaana, hana kaa dhigo kuwa amaanada iyo diinka u saaxiibka ah.

Jawaabta su'aasha koowaad waxaan leeyahay:

xukunka aan dooranayo ee ku saabsan booliska Xamaas waa isla xukunka aan ka qaadannay booliska iyo ciidamada dowladaha kale ee ridada ah, xukunkaasoo ah iney gaalo yihiin.

Waxaan sidaas ku caddeeyay fatwo aniga aan leeyahay oo ku jirta muntadaha su'aalaha ee Minbaru Tawxiid Waljihaad, Nabmarka **(3705),** waxaana cinwaan u ah: **ما حكم شرطة الطواغيت وجنودهم؟"** walaal fatwadaas dib ugu laabo hadii aad jeceshahay.

Jawaabta su'aashaada Labaad waxaan leeyahay:

mowqifkeena jamaacaatka salafiya jihaadiya ah ee ka jira Ghaza waa mowqif taageero, garab istaag iyo u hiillin, alle sarreeyee wuxuu yiri: (**وَالْمُؤْمِنُونَ وَالْمُؤْمِنَاتُ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ**) iyagoo kale waxaan u noqonynaa adeegayaal, waa kuwa aan ku faaneyno kuna xiraneyno rajadeena alle ka dib. Waxaan alle ka baryaynaa inuu mideeyo, u gargaaro oo guuleeyo. Aamiin

Jamaacada aan ku talinayo in raayadeeda lagu biiro Beytul Maqdis iyo hareeraheeda, anigu ma arkin wax ka raayo nadiifsan raayada Jamaacada ALtowxiid Wal jihaad -sida aan ka maleesaneyno alle ayaa oge- alla wanaagsanaan leheydaa in lagu dhinto raayadaas hoosteeda!

Su'aasha Labaad: ka socoto kii jeclaa Sayid Qutub

su'aasha koowaad: markuu mid ka mid ah walaalaha is weydiiyo sababta loo kala qaadayo xukunka xukuumada Ghaza iyo kan xarakada Xamaas waxaan ugu jawaabaa in xukunka xarakada xamaas lagu saleynayo miithaaqa xarakada, halka xukunka xukuumada Ghaza lagu saleynayo dastuurkeeda ay wax ku xukunto una xukun tagto, jawaabtaasi ma sax baa?

Su'aasha Labaad: markii la iclaamiyo dastuur islaami ah miyey banaan tahay in si tartiib tartiib ah loo dhaqan galiyo, sida in xeerarka la dajiyay wax lagu xukumo muddo xoogaa ah? Mise halmar ayaa shareecada si wadajir ah loo dhaqan galinayaa?

Su'aasha saddexaad: maxey shareecadu ka qabtaa doorashooyinka iyo is sharraxida iyadoo lagu hoos noolyahay dastuur islaami ah oo qeexaya in shareecada islaamka ay tahay isha kaliya ee sharci dajinta?

Su'aasha afaraad: waa maxey xukunka wasiirada dowladaha wax ku xukuma dastuurka la dajiyay, wasiiradaasoo aan xiriir la laheyn sharci dajinta ka hor imaanaysa shareecada islaamka, sida wasaaradaha caafimaadka iyo deegaanka oo kale?

Jawaab:

Su;aasha koowaad jawaabteeda waxaan leeyahay:

in la xukumo qof ama jamaaco ama dowlad waxa ay u laabaneysaa oraahda ama ficilka kasoo baxa cida la xakumayo, maxaa yeelay axkaamta aduuunyada waxa ay ku xirantahay oraahda iyo ficilka, sidaasi ayaa loogu xukmiyaa islaamnimo ama gaalnimo maadaama anaga aan fiirineyno qofka muuqaalkiisa kore, wixii u qarsoon allaa og.

Sheekhul Islaam Ibnu Taymiyah allaha u naxariistee waxa uu yiiri:

فالمرتد: كل من أتى بعد الإسلام من القول أو العمل بما يناقض الإسلام بحيث لا يجتمع معه".اهـ

"Murtadka waa kan islaamnimo ka dib la yimid qowl ama ficil burinaya islaamka, maadaama aysan wada kulmi Karin"

[Alsaarim almasluul, bogga 459]

Wuxuu kaloo yiri:

> **"وإذا لم يكن علم الإيمان المفروض صفة لقلب الإنسان لازمة له لم ينفعه، فإنه يكون بمنزلة حديث النفس وخواطر القلب، والنجاة لا تحصل إلا بيقين في القلب، ولو أنه مثقال ذرة، هذا فيما بينه وبين الله. وأما في الظاهر فيجري الأحكام على ما يُظهره من القول أو الفعل".اهـ**

[Alsaarim almasluul bogga 370]

Sidaa awgeed annagu waxaan dadka ku xakumaynaa oraahdooda iyo ficilladooda, hadii sidaas aad garato waxaad garatay waxa xukuumada Xamaas lagu heysto in ay tahay waxa ku jira dastuurka ay wax ku xukunto, xarakada xamaasna waxa lagu heysto ay tahay wax ku yimid miithaaqa u dagsan ee ay ku dhaqmaan, sidaasi ayaa ah sida sawaabka ah ama saxan.

Waxaa haboon in lagu baraarugsanaado in marka aan Xamaas ku gaaleysiiney qawaaniinta la dajiyay in aysan ka dhigneyn inaan gaaleysiineyno xarakada Xamaas!

Sidoo kale hadii Nin ka tirsan Ikhwaanul muslimiin uu wax ku xukumo qawaaniinta la dajiyay taasi macnaheeda maaha inaan gaaleysiineyno jamaacada Ikhwaanul muslimiin.

Gaalnimada waxa ay ka dhalaneyso waa wax cad oo sugan, waa la gaaleysiinayaa qofkii la yimaada oo laga helo shuruudaha lagana waayo mawaanicda, taasna micnaheeda maaha in aan la gaaleysiineynin jamaacada uu ka tirsan yahay, allaah wuxuu meelo badan ku yiri:

(وَلَا تَزِرُ وَازِرَةٌ وِزْرَ أُخْرَى)

Jawaabta su’aaasha Labaad waxaan leeyahay:

sharci ahaan ma banaana in la qodobeeyo shariicada islaamiga ah (loo qoro sidii dastuur) arrinkaas waxaad ugu laabataa kitaabka uu qoray sheekh Bakar abuu Zeyd, kitaabkiisa " فقه النوازل **98-1/27** si fiican ayuu uga hadlay arrintaas.

Kadib waxaa waajib ku ah qofka ahlu towxiidka ah inuu fuliyo amarka alle iyo axkaamtiisa si degdeg ah ee maaha si tartiib tartiib iyo sida aad jeceshahay! Alle kor ahaayee waxa uu yiri:

وَمَا كَانَ لِمُؤْمِنٍ وَلَا مُؤْمِنَةٍ إِذَا قَضَى اللَّهُ وَرَسُولُهُ أَمْرًا أَنْ يَكُونَ لَهُمُ الْخِيَرَةُ مِنْ أَمْرِهِمْ وَمَنْ يَعْصِ اللَّهَ وَرَسُولَهُ فَقَدْ ضَلَّ ضَلَالًا مُبِينًا

Allihii nagu farad yeelay inaan isku xukunno kitaabkiisa uusoo dajiyay nooma uusan idmin inaan tartiib tartiib isugu xukunno, allihii gaaleysiiyay kan wax ku xukuma wax aan aheyn kitaabka uu soo dajiyay uma uusan cudur daarin kan kitaabkiisa si tartiib tartiib ah wax ugu xukumaya

Hadii qof uu yiaahdo: “maanta waxaan allaah u tukanayaa afar salaadood hal salaadna alle qeyrkiis, berrina waxana alle u tukan saddex salaadood laba salaadna alle qeyrkiis, berri dambena waxaan alle u tukan saddex salaadood laba salaadna alle qeyrkiis, maalinka ku xigana waxaana lle u tukan afar salaadood, hal salaadna alle qeyrkiis!” cidna iskuma ay khilaafteen gaaleysiintiisa, sidaas oo kale qofkii shareecada aan si wada jir ah u dhaqan galin waxa uu la mid yahay qof wax ku xukumay xeerarka iyo qawaaniinta la dajiyay.

Abii umaamah waxaa laga wariyay inuu yiri: Rasuulka alle SCW waxa uu yiri: (waxaa furfurmi doona oo baabi’i doona diinta usuusheeda iyo qeybaheeda midba mida kasii dambeysa, markii ay mid baaba’do dadku waxa ay ku dhagayaan tan ku xigta, tan

ugu hor baabi'I doonta waa isku xukunka shareecada, tan ugu dambeysana waa salaadda.) waa xadiith saxiix ah waxaana wariyay ibnu xibbaan iyo qeyrkiis

Jawaabta su'aaasha saddexaad waxaan leeyahay:

qaababkaan ay maanta dadku u doortaan madaxdooda ma ahan wax islaamka shuqul ku leh, waa bidco lagasoo dhoofiyay yuhuudda iyo nasaarada, abii saciid al khudri waxaa laga wariyay in Nabiga SCW uu yiri: (waxaad raacraaci doontaan jidadkii kuwii idinka horreeyay taako taako iyo dhudhun dhudhun, xitaa hadii ay god abeeso galaan waad ka daba galeysaan) waxaan ku niri: rasuulkii alloow kuwaas aan raaceyno ma yuhuud iyo nasaaro baa? Wuxuu yiri (yaa kale?) waxaa wariyay bukhaari iyo muslim

Dariiqa sharciga ah ee lagu dooranayo imaamka muslimka ah ee kulansaday shuruudaha imaamnimada waa iney isku raacaan dadka ay talada ka go'do, ee ma ahan dadka oo dhan!

Culumadu waa ay isku khilaafeen tirada dadka ay talada ka go'do ee dooranaya imaamka, qaar waxa ay yiraahdeen waa ijmaaca ama dadka tala ay ka go'do kulligood, waana sida uu qabo al imaam axmed, sida uu wariyay isxaaq ibnu ibraahiim, **[al axkaam al suldaaniyah : 23]**

Qaarna waxa ay yiraahdeen waxaa ku filan beycada dadka ay talada ka go'do intii suura gal ah kulmintooda, sidaas waxaa yiri al imaam al nawawi **[al rowdah iyo nihaayatul muxtaaj]**

Sidoo kale fiiri qowlka imaamka uu ku yiri **[sharraxa saxiixul muslim 12/72]**

Sidaas oo kale imaam al showkaani wuxuu kasoo guuriyay abii muxammad al juweyni. **[irshaad al fuxuul 161, daabacaada koowaad]**

Al imaam al maawardi isagana waxaa hadal uu leeyahay laga fahmayaa inuu sidaas qabo. **[al axkaam al suldaaniyah 6]**

Al imaam al qalqashandi isna waxa uu yiri: sidaas ayay qabaan asxaabteena shaaficiyada. **[Ma'aathir al inaaqah 1/44]**

Qaarna waxa ay yiraahdeen doorashada imaamka waxaa ku filan iney kulmaan afartan ka mid ah dadka ay talada ka go'do, iyagoo ka qiyaas qaatay salaadda jimcada, sida ay qabaan qaar ka mid ah shaaficiyada oo uu ka mid yahay al Xaliimi**, [waxaa soo guuriyay Al nuweyri kitaabkiisa nihaayatul arbi 3/6]**

Qaarna waxa ay yiraahdeen waxa ay ku guntantaa iney kulmaan shan ka mid ah dadka ay talada ka go'do, waana sida ay yiraahdeen fuqahada badankeed iyo mutakallimiinta reer basra iyo al qaadii cabdul jabbaar oo dhintay 415H , waxa ayna soo daliishadeen beycadii abuu bakar oo ku guntantay shan qofood oo kala ah "cumar, abuu cubeydah, bashiir ibnu sacad, saalim, useyd ibnu xudeyr. Allaha kawada raalli noqdo. Cumar isagu waxa uu arrintu ka dhigay shuura ka dhaxeysa lix qofood.

Qaarna waxa ay yiraahdeen waxa ay ku guntantaan iney kulmaan saddex ka mid ah dadka taladu ay ka go'do, sidaas waxaa qaba qaar ka mid ah fuqahada Kuufa sida uu sheegay Al imaam Al maawardi.

Qaarna waxa ay yiraahdeen waxaa imaamka dooran kara labo kamid dadka ay taladu ka go'do. Sidaas waxaa sheegay al juweyni, daliil ma uusan sheegin, hadii uu ula jeedo labo ayaa dooranaya mid saddexaad waxa uula mid yahay qowlkii hore ee aan soo xusnay.

Qaarna waxa ay yiraahdeen waxaa imaamka dooran kara mid ka mid ah dadka ay taladu ka go'do, sidaas waxaa qaba abii al xasan al ashcari, sida ay soo guuriyeen al baghdaadi, ibnu xazam kitaabkiisa al fisal 3/85. Al qurdhubi kitaabkiisa aljaamic li axkaam al qur'aan 1/269, al baaqalaani iyo qeyrkood. Waxa ayna daliishadeen beycadii abuu bakar maadaama uu cumar ahaa kii beycada la galay abii bakar.

Sidoo kale ibn xazam waxa uu soo daliishaday in dadka shuurada lahaa ee uu cumar la ballamay in ay iska daayeen doorashada oo ay arrinkii u dhiibeen hal qof kaasoo ahaa cabdi raxmaan ibnu cowf, ibn xazam waxa uu yiri: "waxaa ansaxday in la isku raacay in beycadu ay ku guntantay hal qof oo kaliya"

Qaarna waxa ay yiraahdeen imaamka waxaa dooran kara hal qof oo kaliya, laakiin shardi waxaaa ah in doorashadiisa ay leedahay awood, sida ay qabaan al juweyni iyo al ghazaali. Al ghazaali wixii uu ka yiri ka fiiri kitaabkiisa **[fadaa'ix al baadhiniyah: 176-177]** sidoo kale qowlka al juweyni ka fiiri kitaabkiisa **[al ghiyaathi : 72]**

Qaarna waxa ay yiraahdeen waxa la eegayo oo ictibaarka leh waa beycada ay galaan dadka talada ay ka go'do badankooda kuwaasoo xaqiijin kara awood iyo maamul ay wax ku socodsiin karaan, sidaas waxaa qaba al imaam al nawani, ibnu taymiyah iyo qeyrkood

Intaas waa wixii ay culumadu ka yiraahdeen mas'alada doorashada imaamka muslimiinta, meelna ugama eka waxa ay maanta dadku kaga daydeen dhaqamada yuhuuda iyo nasaarada.

Jawaabta su'aaasha afaraad waxaan leeyahay:

allaah waxa uu yiri:

(إِنَّ فِرْعَوْنَ وَهَامَانَ وَجُنُودَهُمَا كَانُوا خَاطِئِينَ)

Allaah waxa uu gaalnimo iyo shirki ku xukumay xaakimkii (fircoon) wasiirada (haamaan) iyo ciidanka. Wasiirku waa kan saacida oo kaalmeeya madaxweynaha ama boqorka, culeeskana ka yareeya

Wasiirada dowladaha riddoobay marka talada loo waxaa lagu dhaariyaa inuu ixtiraamayo dastuurka iyo qawaaniinta kufriga ah dhiibayo, dastuurada waxaa ku xusan qaabka ay u dhaartaan wasiirada oo la mid ah: "waxaan ku dhaaranayaa allaah in aan daacad u noqon doono dalka iyo dowlada iyo amiirka aana ixtiraami doono dastuurka iyo qawaaniinta dowlada"

Ibnu manduur waxa uu yiri: micnaha wasiirka waa kan culeeska ka qaada oo kaalmeeya boqorka, waa tii uu Nabi Muuse CS alle ka baryay: allow qoomkeyga iiga yeel mid wasiir ii noqda" **[Lisaanul Carab 9/288]**

Sheekheena abuu maxamad al maqdisi waxa uu yuri : " shaki kuma jiro in jagooyinkaan (wasiirrada) ay ku kala duwanyihiin

gaalnimada iyo ilxaadka, ayna ku kala duwanyihiin shaqooyinkooda u gargaaridda shirkiga iyo la dagaallanka dadka ahlu towxiidka ah, qaarkood waa ay caddeystaan qaarna waa ay qarsadaan, laakiin dhammaantood waxa ay iska kaashadaan baabi'inta towxiidka iyo kor u qaadidda shirkiga, iyagoo dhidibada u aasaya aasaaska xeerarka iyo dastuurada iyo ixtiraamidooda... waana wax iska cad oo aad loo wada garanayo, qof aan jaahil aheyn muran kama qabo" **[kashful niqaab 157]**

Wasiirka ka mid ah dowladahaan riddoobay waa gaal, haduusan aheyn mid gacal iyo kaalmeeye u ah madaxweynaha, oo uusan wax hiillo iyo garab ah ku siinin dagaalka uu kula jiro ahlu towxiidka, oo uusan ku dhaaranin ixtiraamida dastuurka iyo xeerarka la dajiyay, oo uusan la imaanin wax burin kara islaamnimada, (markaas gaal ma ahan)

Su'aasha saddexaad: ka socoto muqaawamada shabakada xuneyn:

Su'aal ku socota sheekha: sheekhoow alle wuxuu suurada dhaahaa ku yiri aayada 44:

(فقولا له قولا لينا لعله يتذكر أو يخشى).

[Ku dhaha fircoon hadal dabacsan waa intaas oo uu waano qaadaa oo cabsaaye]

Sheekhoow bal fiiri sida uu alle uga dalbay nabi muuse CS inuu fircoon ula doodo in kastoo nabi muuse uu adiga kaa fadli badan yahay, fircoonna uu ka xun yahay xamaas! Maxaad u adeegsataan ad adeyga iyo hadalka qallafsan marka aad la hadleysaan ama wax ka sheegeysaan walaalihiinna xamaas?

Jawaab:

Allaha ku barakeeyo talada aad noosoo jeedisay iyo hadalkaas aadka u cad.

Laakiin waxaa waajib ah in la ogaado in ad adeyga ku wajahan qolo gaar ah uu yahay wax gaar ah, iyo in qolodaas shareecada lagu xukumayo ay tahay wax kale

Hadii aad ku xukunto wixii kaaga muuqda daahirkooda, daliilaha sharcigana ay ku tusaan sidaas, lama oranayo waxaad tahay qof ad adag.

Annaga markaan hadalka u cadeyneyno xarakada xamaas oo aan u sheegeyno in ay ku dhaceen wax islaamka buriya, oo aan kula talineyno iney alle u laabtaan oo towbad keenaan, hadalka ayaan u jilcinnay waana wanaajinnay, kawaran hadii aan ka aamusi laheyn oo aan aduunyada u qarin laheyn waxa ay ku dhaceen aakhirana cadaab daran uu u yaallo!, tan ayaa runtii ah ad adeyga dhabta ah!

Aaditaankii Nabi Muuse CS uu aaday Fircoon iyo sida uu ula taliyay waxa ay soo martay heerar kala duduwan sida uu alle ku cadeeyay kitaabkiisa, alle wuxuu yiri:

(فقولا له قولاً ليّنا لعله يتذكر أو يخشى)

Wuxuu ku billaabay hadal jicilsan sidii uu alle faray, waxa uuna yiri:

(هل لك إلى أن تزكّى وأهديك إلى ربك فتخشى)

Waxa uu tusay xujooyin iyo mucjisaat, markii uu fircoon muujistay beenin, kibir iyo ku adkeysashada baadhilka, waxa uu muuse ku yiri fircoon sida uu alle quraanka ku sheegay:

(لقد علمت ما أنزل هؤلاء إلا رب السماوات والأرض بصائر وإني أظنك يا فرعون مثبورا)

Al imam al dhabari waxa uu yiri: micnaha aayada waxa weeye: "fircoonoow waxaan kuu maleynayaa inaad tahay qof halaagsami doona". Macno kalena waa la sheegay.

Iska daaye Nabi Muuse CS waxa uu habaaray fircoon iyo qoomkiisa isagoo yiri:

(ربنا إنك آتيت فرعون وملأه زينة وأموالاً في الحياة الدنيا ربنا ليضلوا عن سبيلك ربنا اطمس على أموالهم واشدد على قلوبهم فلا يؤمنوا حتى يروا العذاب الأليم)

Hadaba hadal jiclan ama dabacsan waxaa lagula hadlaa qofka jaahilka ah ee qof kibir badan oo baadhil ku taagan kuna adkeysanaayo ma mudna in hadal dabacsan lagula hadlo!

Xukuumada xamaas waxa ay iskala weynaatay xitaa iney wax ka maqasho dadka xaqa u sheegaya, waxa ay dishay qaarkood sida alsheekh Abuu Alnuur Al maqdisi allaha u naxariistee. Xitaa ma aysan horgeynin sharciga ay caabudaan, waxaa u xiran oo xabsigooda ku jira sheikh Abuu alwaliid almaqdisi-llaha soo furtee, waxaan kaloo idiin sheegayaa arrin aan hada ka hor la shaacin, taasoo ah: in mid ka mid ah culumada aadka loo qadariyo oo cilmi bandanna lagu yaqaano uu risaalo naseexo iyo talooyin ah u qoray xukuumada xamaas, risaaladii waxa ay gaartay mid ka mid ah masuuliyiinta ugu waaweyn xukuumadaan kibirka badan, masuulkii ma uusan akhrin risaaladii, xitaa ma uusan aqbalin!, wuxuu amray in lagu celiyo meeshii ay ka timid!.. kibir iyo isla weyni intaas ka badan miyaa jira?!

Sheekheena abuu maxammad almaqdisi – allaha soo furtee- waxa uu yiri: kuwa ku hadaaqaya nusuusta beerjileeca, fududeynta oo fududeynaya ku hadalkeeda kuna xambaaraya meel aysan galin, dhigayana meel aan booskeeda aheyn, waxaa haboon in arrinkaa ay ka joogsadaan, ka fikiraan oo si aad ah u fahmaan hadii ay daacad ka tahay….

Si fiicanna ha u ogaadeen in ruuxii si kasta wax loogu sheego loona cadeeyo in isku xukunka wixii uusan alle soo dajinin ay tahay gaalnimo, ogaada /la ogeysiiyo in aysan bannaaneyn isku xukunka wixii aan shareecada alle aheyn, laakiin sidaasoo ay tahay ku adkeysanaya baadhilka isna kibrinaya…… kaasoo kale ma bannaana in loo mujaamaleeyo ama loo muujiyo hiil iyo garab, mana lagu oranayo wax aan aheyn sidii uu Nabi ibraahiim iyo asxaabtiisa ay ku yiraahdeen tolkooda: waxaan bari ka nahay idinka iyo shirkigiina, dastuurkiina iyo dowladiina, waxaana ino dhaxeeya cadaawad iyo colleytan……

[Millat Ibraahiim safxada 26-27]

Su’aasha Afaraad: ka socoto kii jeclaa al baghdaadi iyo al muhaajir shabakada Xuneyn

Waa maxay naseexada iyo talada aad u haysaan mujaahidiinta reer Ghaza?

JAWAAB:

Allaha u naxariisto labada sheekh al baghdaadi iyo al muhaajir, allaha kaa dhigo kii ugu fiicnaa ee jidkooda raaca kuna sabra..

Hadaan u gudbo nasiixada iyo talada aan u hayo mujaahidiinta reer Ghaza ee ku taagan manhajka xaqa ah, waxaan ku qoray risaaladeyda aan cinwaan uga dhigay "**رسالة تأييد لجماعة التوحيد**" raadso oo iyada akhri alle idankiis waxaad ka heli doontaa waxa aad raadineysid, kana qeybqaado risaaladaas faafinteeda hadii aad ku aragtid run iyo xaq, rasuulka SCW waxaa ka sugan inuu yiri: (**من دل على خير فله مثل أجر فاعله**).

Su;aasha Shanaad: ka socoto abii Cubeydullaah

Su’aasha koowaad: waxaan ka shaqeeyaa xifdinta qur’aanka kariimka ah waxaana si iskaa-wax-u-qabso ah uga howlgalaa wasaarada awqaafta iyo arrimaha diinta ee hoos tagta xukuumada xamaas, arinkaasi ma bannaan yahay? Maxaadse igula talinaysaa?

Su’aasha Labaad: ma igula talineysaa inaan ku biiro guutada al qasaam? Alqasaam ma koox ku taagan jaahiliyad baa ?

Su’aasha saddexaad: sheekh abuu sacad al caamili waxa uu yiri: xukuumada xamaad waa xukuumad murtad ah, ciidankeeda iyo hogaankeeda, arrinkaas maku raacsantahay? Allaah dartiis baan kuu jeclahay.

JAWAAB:

Alle hakuuu jeclaado sidii aad ii jeclaatay,

jawaabta Su’aashaada koowaad waxaan leeyahay:

wax dhib ah kuma sugna inaad qur’aanka kaga shaqeysid wasaarada awqaafta iyo diinta ee hoos tagta xukuumadaha riddoobay sida tan xamaas oo kale, hase ahaatee waxaa kuu fiican in xifdinta quraanka iyo bariddiisa dadka ay noqoto mid

aad u madax bannaan tahay, Rasuulka SCW waxaa ka sugan inuu yiri:

(**خيركم من تعلم القرآن وعلمه**) ama (**إن أفضلكم من تعلم القرآن وعلمه**)

"Waxaa idiin kugu kheer badan ama idiin kugu fiican kan qur'aanka barta dadkana bara."

Hadiise ay shardi kugu xiraan oo ku faraan inaad xaqa iyo baadilka aad dadka isugu dhex darto ma aad iyaga mad-habkooda iyo fikirkooda ku waafaqdo, markaasi waxaa reebban inaad shaqadaas qabato maxaa yeelay waa meesha yimid shuruudo baadhil ah, Rasuulkana SCW waxaa ka sugan inuu yiri: shardi kasta oo aan kitaabka alle ku jirin waa mid baadhil ah.

Waxaan kuu dardaarmayaa inaad xaqa iyo runta cadeysid si kasta oo aad tahay, dadka aad quraanka u bartid cilmi ahaan iyo ku camal falid intaba. Ibn al qayyim allaha u naxariistee wuxuu yiri:

"ومن فَقَّهه في دينه فقد أراد به خيراً إذا أريد بالفقه العلم المستلزم للعمل، وأما إن أريد به مجرد العلم فلا يدل على أن من فقه في الدين فقد أريد به خيراً"

"Qofkii uu alle diinta fahamsiiyay waa mid uu kheer la doonay hadii uu lala doonay cilmi iyo camal is wata, laakiin hadii lala dono cilmi oo kaliya, taasi macnaheeda ma ahan in ruuxii diinta fahmaa lala doonay kheer"

[Miftaax daar alsacaadah 1/60]

Jawaabta su'aashaada Labaad waxaan leeyahay:

kooxda Alqassaam hadii hore ay u aheyd koox islaami ah, oo sheekh cizzuldiin alqassaam allaha u naxariistee uu kamid ahaa culumada mujaahidiinta, maanta ma uu oga waxa ay la yimaadeen isaga dabadii kuwa u nisba shaaganaya!

Waxa ay heshiisyo nabadgalyo la galeen cadowga alle, waxa ay dagaalka ku koobeen kaliya yuhuuda sida tooska xooga u heysta

dhulkooda, sidoo kale waxaa xabadooda ka nabad galay yuhuuda, halka dadka muslimiinta ah ee xaqa ku taagan ay ka nabad gali waayeen xabadooda.

War saxaafadeed kasoo baxay guutada alqassaam kuna saabsanaa dhacdooyin ay Marinka Gaza kula kulmeen dad mareykan ah waxa ay ku sheegeen in:

Guutada Alqasaam hubkeeda ay ku wajahanyihiin yuhuuda dhulkooda heysata, dagaalkoodana uu yahay falastiin darted oo kaliya.

In mareykanka uu yuhuuda kala qeyb qaadanayo dhamaan dambiyada ay ka galayaan shacabkeena, laakiin dagaalkeena uu ku wajahanyahay yuhuuda oo kaliya balse aanan col laaheyn mareykanka.

Waxaa kaloo ay hiil iyo taageero siiyeen gaalada asalka ah iyo murtadiinta iyagoo gashan shaar midnimo wadaniyad, sida ku xusan bayaan kasoo baxay alqasaam 29ka shawaal 1422.

Sidoo kale waxa ay dhex galeen diin dimuquraadiyad oo waa ay ka qeyb qaateen iyagoo dhidibada u taagay qawaaniinta la dajiyay, sida ku xusan bayaan kasoo baxay alqasaam xilligii dorashada:

Waxaan cadeyneynaa maanta iney tahay maalin weyn oo taariikhi ah oo dadka reer falastiin ay si xoriyad ah u doranayaan dadkii u matali lahaa golaha sharci dajinta.

Waxaan cadeyneynaa taageerada aan u hayno maamulka wadaniga ah sida uu isaga xilsaaray ilaalinta habsami u socodka dimuquraadiyada iyo ilaalinteeda

Waxaan cadeyneynaa ku dhaqanka iyo ixtiraamida qawaaniinta dimuquraadiyada

Sidoo kale bayaanaatka alqasaam kasoo baxay waxaa ku xusan in dhamaan kuwa u dhintay iyagoo difaacaya amaanka iyo qawaaniinta ay yihiin shuhado!

Arrimahaas iyo kuwo kaleba dartood, waxaad si dhab ah u ogaaneysaa in hadii aad ku dhimato raayada alqasaam hoosteeda iney la mid tahay adigoo ku dhintay jidka ilaalinta qaanuunka, dhaqangalinta qaanuunka, waxaaba laga yaabaa inaad dhimato adigoo weerar ku ah kuwa diinta u gargaara ee doonaya in sharciga alle lagu dhaqmo

Imam Muslim waxa uu soo saaray in abii hureyrah uu nabiga SCW ka wariyay :

ومن قاتل تحت راية عمية يغضب لعصبة أو يدعو إلى عصبة أو ينصر عصبة فقتل فقتلة جاهلية

"Qofkii la dilo isagoo difaacaya, u gargaaraya, u dagallamaya oo faafinaya, waxaa uu dhintaydhimasho jaahiliyad ah"

Warin kale waxa ay leedahay:

ومن قتل تحت راية عمية يغضب للعصبة ويقاتل للعصبة فليس من أمتي

Hadii aad dooneysid inaad si fiican uga bogatid xaqiiqada kooxdaan, waxaad dib ugu laabataa kitaabka **القول الأساس في حكومة حماس** ee uu qoray alsheekh abii Cubeydullaah almaqdisi, waxaa hordhac u sameeyay sheekheena abuu maxamamd almaqdisi, allaha soo furto.

Dhanka kale, xukuumada Xamaas xukunkeeda sida aan horey u sheegay waxaan u arkaa iney tahay xukuumad gaalo ah, xukuumaduna waa maamulka sharci dajinta, kan fulinta, iyo kan garsoorka. Alle ayaa wax walba inaga og.

Su'aasha Lixaad: ka socoto abuu Muscab algharíib

Su'aasha kooowaad: maxaad kula talineysaa walaalaha fududeystay gaaleysiinta oo culuamdii hore aysan ku dagdagi jirin, oo dadka qaar ay noqdeen iney tuhunka gaalnimada ah ku tuuraan dadka iyagoo aan daliil haysanin?

Markii uu nin culumada ka tirsan uu bixiyo fatwo dullinimo ah oo taabaneysa caqiidada, dadka qaar waxa ay dhahaan sheekhii waa uu inxiraafay ama waa uu khaldamay ama maba ahan sheekh,

markaas kuwa kalena waxa ay yiraahdaan sheekha cid aan sheekh uma jawaabi kato. Jawaab daliil leh ayaan rabnaa??

JAWAAB:

Jawaabta su'aasha koowaad waxaan leeyahay:

gaaleysiinta waa xaqa alle iyo midka rasuulka, qofna uma bannaana inuu ka hordhaco oo xaqaas uu ku dagdago isagoon haysanin cadeyn iyo xujo cad oo sida qorraxda u muuqata!

Sheekhul islaam ibnu taymiyah allaha u naxariistee wuxuu yiri: "iimaanka iyo kufriga waxey ka mid yihiin axkaamta lagu sugo risaalada, daliil sharci ah ayaa lagu kala saaraa mu'minka iyo gaalka ee laguma kala saaro daliil caqli ah"

[majmuuc al fataawaa 3/204]

Waxaa kaloo uu yiri: "gaalnimadu waa xukum sharci ah, caqliguna waxaa lagu ogaadaa hadalka kiisa saxan iyo kan khaladka ah, wax kastoo caqli ahaan khalad ah ma noqonayo gaalnimo xaqa sharciga, sida wax kasta oo caqli ahaan sax ah aysan waajib u noqoneynin in la garto/barto

[Dar'u tacaarud al naqli wal caqli 1/242]

Al imam ibnu qayim allaha u naxariistee waxa uu nuuniyadiisa ku yiri:

Gaalnimadu waa xaq alle iyo mid rasuul,

nas ayaa lagu sugaa gaalnimada ee laguma sugo hadal hebel uu yiri.

Qofkii ay gaaleysiiyeen alle iyo rasuulkiisa ayaa gaal ah.

Sidaasi darted waxaan walaalaheyga dhalinyarada ah kula talinayaa meel kasta oo ay joogaan ineysan ku dagdagin gaaleysiinta oo aysan dadka diinta uga saarin malo iyo shaki, maxaa yeelay hadalkooda waa mid la qorayo allena waa uu

waydiin doonaa maalinta qiyaame, su'aalahaas jawaab ha u diyaarsadeen, Jawaabahana kuwo sax ah!

Hadalkeygaan macnihiisa maaha in la xiro baabka gaaleysiinta guud ahaan, qofkii ay gaalnimadiisa cadaato waa la takfiirinayaa si xaq ah oon khalad laheyn.

Jawaabta su'aasha labaad waxaan leeyahay:

qofka caalimka ahi haduu mas'alo ku khaldamo macnaheedu ma ahan in cilmigiisa la duro, ama la inkiro cilmiga iyo fadliga uu leeyahay.

Yaaquut al xamawi wuxuu yiri: waxaa qasab ah inuu caalimku jahli ku dhaco, inuu garan waayo wax badan oo la waydiiyo, inuusan maqlin ama uu hilmaamay weeye. **[irshaad al areeb1/24]**

Sheekhul islaam ibnu taymiyah allaha u naxariistee wuxuu yiri: hadii ay dhacdo in caalim weyn oo fatwooda uu ku gafo boqol mas'alo ma ahan wax ceeb ah. **[majuuc al fataawaa 27/301]**

In ruuxa caalimka ah ahi laga xasdo ama laga inkiro fadligiisa iyo cilmigiisa waxa ay ka mid tahay dhaqamada yuhuuda.

Dhanka kale, in qofka gafay la raddiyo oo loo jawaabo loona shardiyo in kan raddinaya uu ku ayni yahay [la siman yahay cilmi ahaan] kan la raddinayo hadii u jawaabista ay tahay midku dhisan cilmi iyo dulqaad wax dhibaato ah malaha in taabici uu raddiyo saxaabi, ama qof yar uu raddiyo qof isaga ka weyn, ama qof dumar ah ay raddiyo qof rag ah, ama qof caami ah uu raddiyo qof caalim ah... iwm

Sidaas ayuu ahaa dhaqanka iyo sida saxda ah tan waagii uu nabiga SCW noolaa ilaa mantadaan aynu joogno.

Tusaale, hadii imaamka salaada uu khaldo, qofka ku daba tukanaya ee u sheegaya ama xasuusinaya meesha uu khalday ma waaa shardi ah inuu ahaado imam isaga la mid ahama caalim?

In qofki khaldama ama gaf ku dhacaa la qabto oo la saxo ama la raddiyo si cilmiyeysan waa nasiixo guud oo alle, rasuulkiisa, madaxda muslimiinta iyo dadweynaha intaba u sugnaatay.

Su'aasha toddobaad: **ka socoto abii cubeydullaah.**

Assalaamu caleykum waraxmatullaahi wabarakaatuh.

Xayaakallaahu sheekheena allaha jannada gurigeena haka dhigo, ka dib

Su'aasha koowaad: side ayuu adoonka niyadiisa uga dhigaa mid khaalis u ah alle, side ayuu qalbiga u dareensiiyaa midaas?

Su'aasha labaad: Yaasir Carafaat ma gaalnimo iyo riddo ayaa lagu xukminaaa? Saddaam Xuseen ma sidaas oo kalaa? Hadii uusan sidaa aheyn, sidee ayaa looga jawaabi shubhada ah in hadlkii ugu dambeeyay ee uu saddaam yiri uu ahaa kalimada towxiidka?

JAWAAB:

Jawaabta su'aasha koowaad waxaan leeyahay:

niyada oo alle loo khaali syeelo waa id ka mid ah shuruuda aqbalaada acmaasha wanaagsan sida ku xusan xadiithkii uu wariyay cumar : **إنما الأعمال بالنيات,** ibn Rajab wuxuu yiri isagoo sharraxaya xadiithan: niyadu waa miisaanka acmaasha.

Ruuxa wuxuu u baahan yahay inuu dadaalo si uu niyada alle ugu khaalis yeelo, dadaalkaasna waa mid looga baahan yahay lagasoo bilaabo markuu qaan gaaro ilaa uu ka dhimanayo ama caqligiisa uu suulayo.

Waa inuu mar walba naftiisa xisaabiyaa oo uusan ka daalin, waa inuu mar walba ka cabsadaa in acmaashiisa aysan ikhlaas ka eheyn, waxaa la wariyay in qaar asxaabta Nabiga SCW ka mid ah ay naftooda nifaaq uga cabsan jireen, sida Cumar oo mar waydiiyay Xudeyfa inuu u sheego in lagu daray munaafaqiinta iyo in kale?!

Al xasan al basri waxaa laga wariyay inuu yiri: “nifaaq kama nabad galo qof aan munaafiq aheyn.

Waxyaalaha ugu waaweyn ee ikhlaaska kugu kaalmeyn kara waxaa ka mid ah garashada alle iyo shareecadiisa sida uu alle kitaabkiisa ku yiri:

إِنَّمَا يَخْشَى اللَّهَ مِنْ عِبَادِهِ الْعُلَمَاءُ إِنَّ اللَّهَ عَزِيزٌ غَفُورٌ

“Dadka cilmiga cilmiga leh oo kaliya ayaa alle ka cabsada”

Al imam Mujaahid iyo culumo kale waxaa ka sugan iney dhihi jireen: waxaan raadinnay oon dalabnay cilmi annagoo aan wax niyad ah u haynin, ka dib ayuu alle nagu arsaaqay niyad khaalis ah.

Al imam al nawawi waxa uu yiri: qofka waxaa u wanaagsan inuusan ka joogsanin raadinta cilmiga isagoo sabab ka dhiganaya inuusan laheyn niyad khaalis u ah alle. Waxaa loo rajeyn ruuxa in niyadiisu wanaagsanaato….. **[Al majmuuc 1/30]**

Jawaabta su’aasha labaad waxaan leeyahay:

shaki kuma jiro gaalnimada Yaasir Carafaat, waliba gaalnimadiisa kama qarsoona xitaa murji’ada casrigaan, u fiirso arrintaa!

Gaalnimadiisana waxaa u sabab ah waxyaalo badan oo keena gaalnimada oo uu ku dhacay intuu noolaa, waxaa ugu waaweyn: inuu qaatay mabda’a cilmaaniyada, ku xukmida dastuur/xeerar la dajiyay, kaalmeynta iyo u gargaarida cadowga alle ee isugu jira gaalada asalka ah iyo murtadiinta.

Waxyaalahaas islaamnimada buriya horey ayaan uga soo hadalnay.

Dhan kale Sadaam Xuseen xukunkiisu waa mid adag, laakiin waxaan ku xukumeynaa asalka iyo daahirkiisa waxa inooga muuqda, wixii u qarsoon alle ayay u taallaa.

Asalka Sadaam Xuseen waa Murtad, sabatuna waa qaadashada uu qaatay mabda’a bacthiga, ku xukminta wixii uu alle soo

dajiyay wax aanan aheyn, xiriirinta iyo garab istaagga cadowga alle ee gaalada ah.

Markii la qabtay ma uusan ka towbad keenin-sida aan ognahay-waxayaalaha uu ku gaaloobay, waliba markii la maxkamadeynayay waxa uu ku adkeysanayay mabda'iisa gaalnimada ah ee bacthiga.

Kaliya waxa uu ku dhawaaqay labada shahaado, markaan gaaleysiineyno uma aynaan gaaleysiinin inuu diidan yahay labada shahaado, laakiin wuxuu la yimid waxyaalo burinaya labada shahaado, labada shahaado kaligood inuu ku dhawaaqo uguma filna islaamnimo, hadii uusan ka towbad keenin waxbaayaha buriya.

Al imam al kashmiiri waxa uu yiri: qofkii inkira ama diida arrin daruuri ah sida khamrada iney xaaraan tahay oo kale, waa inuu ka towbad keenaa ama ka laabtaa, maxaa yeelay, hadii aadan ka towbad keenin diidistaas, labada shahaado kaligood kuma anfacayaan. **[Ikfaar al mulxidiin, boga 63]**

Waxaa la mid ah sida ay culumada sheegeen yuhuudiga qirsan towxiidka uu muslim noqonayo kaliya isagoo qira in Muxammad SCW yahay rasuulka alle, maxaa yeelay, towxiidka kaliya uguma filna islaamnimo. Waxaana daliil u ah xadiithka anas laga wariyay in yuhuudi uu nabiga ku yiri: waxaan qirayaa in aad tahay alle rasuulkiisa, ka dib waa uu dhintay yuhuudigii, nabiga SCW waxa uu yiri: ku tukada saaxiibkiin. Waxaa saxiiisyay al albaani **[kitaabka al irwaa, nambarka 2480**] waxaa kaloo u daliil ah wiilka yahuudiga ee xanuunsanaa ee nabiga SCW uu booqday, wilkaasoo islaamay.

Xadiithka uu soo saaray abuu daa'wuud ee ah **من كان آخر كلامه من الدنيا لا إله إلا الله دخل الجنة** waxaa lagu xambaarayaa ruuxa aan la imaanin wax buriya kalmadaas ama kasoo horjeeda oo ka dhiga mid aanan la aqbaleynin.

Alle waa tii uu ka sheekeeyay fircoon markii uu ku dhawaaqay inuu alle rumeeyay iney aheyd markii uu badda ku maanshooday, taasna aan laga aqbalin.

[Suurada Yuunus, ayaadaha 90-91]

Culumada waxay yiraahdeen: iimaanka fircon waa mid aan laga aqbalin, maxaa yeelay iimaan iyo towbo xilligaas lama aqbalo. **[Tuxfat al axwadi 8/505]**

Dib ugu laabo fatwada nambarkeedu yahay **82** ee al sheekh abii usaamah al shaami muntadaha su'aalaha ee shabakada minbar al towxiid wal jihaad.

Su'aasha siddeedaad: ka socoto daalib al xuur

Su'aasha koowaad: waa maxey risaalada aad u direysid walaalaheena aan isku manhajka nahay ee reer Liibiya?

Su'aasha labaad: waa maxey risaalada aad u direysid kooxaha ka jihaada ciraaq ee ilaa hadda aan beyco la galin dowlada islaamiga ee Ciraaq?

JAWAAB:

Jawaabta su'aasha koowaad waxaan leeyahay:

risaalada aan u dirayo walaalaheena reer liibiya ee xambaarsan manhajka saafiga ah waxaan ku qoray risaalada cinwaankeedu yahay **"يا أهل الفلاح؛ أوقد وضعتم السلاح؟!"** waxaan alle ka baryayaa iney gaarto quluubtoodana ay taabato ayna ku camal falaan. Aamiin

Jawaabta su'aasha labaad waxaan leeyahay:

muxuu dowlada islaamiga ciraaq arrinteeda ka dhihi karaa adoonka faqiirka ah waqtigaan aadka u dheer iyo sanadahaan ka dib?! Muxuu ka dhihi karaa adoonka faqiirka ah ka dib wixii ay ka yiraahdeen hogaanka jihaadka iyo culumadiisa waaweyn?!

Marar badan ayaan ku celceliyay oon ka dalbaday ururuda xaq u dirirka ah ee ciraaq in ay hoos isku dhigaan alle dartiis, ayna beyco ama heshiis la galaan dowlada islaamiga ee ciraaq iyo amiirkeeda, laakiin wax jawaab ah kama maqlin ilaa hadda!

Laakiin mar kale ayaan ku celinayaa oon leeyahay ciraaq geesiyaasheedoow, kuwii jabiyay gaalada iyo minaafiqiinta: kitaabka alle laabtiina u fura, oo u dhug lahaada inta aayadood ee ku arooray midnimada iyo in mu'miniinta ay noqdaan hal jamaaco. Ka dib baara kutubta sunada oo ajiiba awaamirta midnimida, is kaalmeynta, walaaltinimada iyo isku gargaarida.

Al xaafid ibnul xajar wuxuu ka yiri faa'iidada heshiiska: "waxa ay wanaag iyo ammaan u tahay xasan ibnu cali, madaxtinimada ugama uusan tagin tabar darro, awood la'aan iyo dullinimo, laakiin waxa uu uga tahay isagoo ka doortay waxa alle agtiisa yaalla, iyo isagoo ilaalinaya dhiiga muslimiinta, wuxuu fiiriyay maslaxada diinta iyo tan umada". **[Fatxul baari 13/71-72]**

Ogaada in beyco aad la gashaan amiirka dowlada islaamiga ciraaq ay guul u tahay islaamka iyo muslimiinta, ayna jab ku tahay gaalada iyo gaalnimada. Al xasan ibnu cali markii uu imaarada uga tanaasulay mucaawiya ibnu abii sufyaan waxaa aad u xoogeystay awoodda muslimiinta.

Ibnu abii zarcah al dimishiqi wuxuu yiri: "markii cismaan la dilay, dadkuna ay kala qeybsameen. Ma aysan jirin wax duullaan ah oo muslimiintu ay qaadeen ilaa umadu ay ku kulantay mucaawiya".

Abii bakar al maaliki wuxuu yiri: "fitnada ayaa dhacday, cismaan waa uu shahiiday, gadaashiis waxaa xilka qabtay cali, afrika sideeda ayay iska sii aheyd ilaa uu mucaawiya xilka qabtay".

Waa kuwaa mareykanka iyo xulafadiisa waa ay xirxirteen alaabahooodii iyagoo jabay kana cararaya weeraradiina, waxaa idiin haray oo kaliya dabadhilifyadooda, ee sidii aad uga adkaan laheydeen u kaashada naftiina iyo maalkiina oo aad alle ka iibisaan, iyo inaad beyco la gashaan cida sharciga alle idinku xukumeysa.

Su'aasha sagaalaad: ka socoto abii xafsa alsunni alsunni

Su’aasha koowaad: waa sidee mustaqbalka wax ka qoridda arrimaha jihaadka xilli ay jiraan weerarada aad u daran ee ka imaanaya murji’ada casriga waase maxay hababka loola dhaqmo iyaga iyo been abuuradkooda?

Su’aasha labaad: waa maxay habka ugu fiican ee loola macaamilo daraasaatka iyo warbixinnada hay’ada RAND iyo shaqaalaheeda, iyo sida loo raddinayo shubhada ugu dambeysay ee ay ku sheegeen in Alqaacida uu gabbalkeedii dhacay ka dib dhimashada sheekh usaama iyo sheekh al cowlaqi?

Su’aasha saddexaad: waa maxay kutubta aad nagula talinaysid barashadooda marka laga soo tago, kutubta Ibnu taymiyah, kitaabka fatxul majiid, kitaabka al mughni, kitaabka waabil alsayib. Iyo kuwa kale ee caanka ah, talo naga sii kutubta laga helo raddinta shubuhaatka.

JAWAAB:

Jawaabta su’aasha koowaad waxaan leeyahay:

waxaan kuugu bishaareynayaa adiga iyo walaalaha manhajka xaqa ah xambaarsan in murji’ada casriga ay sii dhimanayaan sababo badan awgood waxaana ugu muhiimsan, kutubka ay qoreen dadka xaqa ku taagan oo gashay lagana heli karo guri walba iyo baraha internetka.

Manta waxa ay noqdeen kuwo dulleysan oo aan waxba laga dhageysanin, gaar ahaan markii ay billaabatay dibadbaxyada kacaanada carabta, hada waxa ay noqdeen kuwo dulleysan oo la yaso waxna aan la weydiinin, culumada xaqa ku taagan waxaa la gudboon in ay u naxariistaan maba mudnee wax naxariis ah! Waa iney ku dadaalaan iney umada u bayaaniyaan una cadeeyaan murjia’a khaladkooda iyo beentooda, xaga warbaahintana waa iney kala hadlaan dadka si umada looga digo kuwaas khaladkooda.

Sheekhul islaam ibnu taymiyah wuxuu yiri: “imam axmad ibnu xanbal ayaa la waydiiyay: ninka tukada, ee sooman ee ictikaafka miyaad jeceshahay mise kan raddiya ahlu bidaca?

Wuxuu yiri: ruuxa sooma, tukada oo ictikaafa naftiisa ayuu u sameeyay, laakiin hadii ruuxa uu ka hadlo ama raddiyo ahlu bidaca waxa uu u sameeyay muslimiinta, midan ayaana wanaagsan oo jeclahay”. **[Majmuuc al fataawaa 28/232]**

Marka dadka ay u caddaato baadhilka mad-habka kooxdaan-hadey doonaan ha lahaadaan dhar gaagaaban, gar dhaadheer, hana sheegteen iney heestaan mad-habka salafka suuban- markaas dadku waxa ay u baahan yihiin cid wax u sheegta oo wadada saxda ah ku hagta una fatwooda arrimaha waaweyn ee dunida manta ka dhacaya, cid ka hadli kartana waxaa ka jira dadka xambaarsan manhajka saxda ah, manhajka salafiya jihaadiya. Sida muuqanata mustaqbalka iyagaa ah kuwa guusha dambe yeelanaya. Alle kor ahaaye waxa u yiri:

وَعَدَ اللَّهُ الَّذِينَ آَمَنُوا مِنْكُمْ وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَيَسْتَخْلِفَنَّهُمْ فِي الْأَرْضِ كَمَا اسْتَخْلَفَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ وَلَيُمَكِّنَنَّ لَهُمْ دِينَهُمُ الَّذِي ارْتَضَى لَهُمْ وَلَيُبَدِّلَنَّهُمْ مِنْ بَعْدِ خَوْفِهِمْ أَمْنًا يَعْبُدُونَنِي لَا يُشْرِكُونَ بِي شَيْئًا وَمَنْ كَفَرَ بَعْدَ ذَلِكَ فَأُولَئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ

Jawaabta su’aasha labaad waxaan leeyahay:

taasi waa caadadooda, diinta kuma xirna dad, hadii diintu ay ku xirnaan laheyd dad, oo diintu ay noolaaneyso markii dadkaas ay noolyihiin ayna dhimaneyso marka dadkaasi dhintaas, diintu waa ay dhiman laheyd markii uu rasuulka SCW geeriyooday!

Al imam ibnu Rajab ayaa tilmaamay in geerida rasuulka ay aheyd musiibo weyn oo muslimmintu ay la dhibtoodeen geeridiisa.
[ladhaa’if almacaarif, bogga 114]

Al imam ibnul carabi sidoo kale wuxuu sheegay: “xaalkii ayaa muslimminta ku xumaaday, geerida rasuulka waxa ay aheyd

musiibo mida ugu weyn...." **[al qawaasim min al cawaasim, bogga 38]**

Ninkii caabuduyay sheekh cabdullaah cazaam, ama sheekh usaama ama sheekh abuu muscab al zarqaawi ama sheekh abii cumar al baghdaadi ama sheekh anwar al cowlaqi ama sheekh.. ama.... Ama...dadkaas kulligood waa geeriyoodeen, qofkii allaah caabudayayna alle sarreeyee waa noolyahay mana dhimanayo

Sheekh usaama allaha u naxariistee wuxuu yiri: "alle idankiisa, burburka mareykanka waa dhawyahay, burburkeedana kuma xirna inuu noolyahay adoonka faqiirka ah ee Usaama, alle fadligiis baraarugii waa uu billaabmay".

Musiibadii nagu dhacday markii ay naga dhinteen geesiyaashaas waxaan ku xasuusaneynaa musiibada geeridii nabiga SCW, Musiibadiisa waa tan ugu weyn musiibooyinka sida uu sheegay al imam al qurdhubi, maxaa yeelay waxyigii ayaa go'ay, nabinimadii ayaa geeriyootay, waxaana soo baxay shartii ugu ugu horreysay oo ah carabta oo riddoowday diintana ka laabatay, iyo balaayooyin kale. **[Al jaamic li axkaam alqur'aan 2/176]**

Jawaabta su'aasha saddexaad waxaan leeyahay:

maktabada islaamiga waa mid aad u weyn, cimriga waxa uu dhamaadaa iyadoo aan la dhameynin 10 meelood meel ka mid ah maktabdaas.

Waxaan kuu dardaarmi saddex kitaab, waa dardaarin uu I siiyay mid ka mid ah sheekhyadeyda, waxa uuna igu yiri: Tafsiirka Ibnu Kathiir, kitaabka Almughni ee ibnu Qudaama, iyo kitaabka Fatxul baari ee Ibnu Xajar.

Waxaa kaloo ku darsataa hadii aad awoodid kitaabka Majmuuc al fataawaa Ee sheekhul islaam Ibnu Taymiyah, sheekh c/qaadir

cabdi casiis allaha soo furtee waxa uu yiri: kutubka islaamka waxaa ugu muhiimsan afar:

1.Tafsiirka Quraanka oo uu leeyahay al imam Ibnu Kathiir oo ah kitaab tafsiir oo aad u qiimo badan uguna fiican

2.Fatxul Baari sharaxa Saxiixul Bukhaari oo uu leeyahay al xaafid Ibnu Xajar, waana sharraxa ugu fiican ee saxiixul bukhaariga

3.Kitaabka al Mughni ee uu leeyahay al imam Ibnu Qudaama, waa kitaab fiqi ah oo aad weyn.

4.Majmuucu Fataawaa Ibnu Taymiyah, oo isna ah kitaab aad u qiimo badan oo ay ku dhanyihiin masaa'il fara badan oo dhanka caqiidada salafka iyo axkaamta fiqigaba ah.

Afartaas kutub ayaa ah kuwa ugu waaweyn kutubka culuumta islaamka, waxaana ku dardaarmeynaa in iyaga aad looga faa'iideysto

Hadii aar dooneyso jadwal dhameys tiran oo aad cilmiga ku barato ka dibna aad umada u fatwooto, waxaad kaalmo weydiisataa allaah dadaalna samee adigoo raacaya talooyinka ku sugan kitaabka **Aljaamic Li dhalab Al cilmi alshariif** ee uu qoray sheekh C/qaadir C/casiis allaha soo furto.

Su'aasha Tobanaad: ka socoto Asadu towxiid ee shabakada xuneyn

wax manooga sheegi kartaa qofka uu yahay alsheekh abuu Hammaam al Athari?

JAWAAB:

Allaha ku barakeeyo hana kugu sugo manhajka saxda ah..

Hadii aan ka jawaabo su'aashaas, waxaan leeyahay: horey ayaan kuga hadlay taariikhda iyo nolosha waxbarasho ee adoonka

faqiirka, taasna waa markii la igu qasbay inaan ka hadlo, anigoo kale ma uunan aheyn inuu naftiisa ka hadlo hadii aynan jiri laheyn dan igu qasabtay.

Waxaad eegtaa muntadaha su'aalaha ee shabakada Minbar Al towxiid Wal jihaad, su'aasha Cinwaankeeda uu yahay : waa maxay tarjumada sheekh Abii Hammaam, Bakar ibnu C/casiis Al athari?, su'aal nambar **3875**.

Su'aasha Tobanaad: ka socoto abii cumar al falastiini shabakada xuneyn

Su'aasha koowaad: waa maxay ra'yigiina ku aadan ciidamada Nato galitaankooda Liibiya, qof kasta waxa uu ogyahay in Nato aysan Liibiya u galin Jaceyl ay u qabto shacabka Liibiya, iyo in dadka reer Liibiya ay ku qasbanaadeen iney kaalmeystaan Nato?

Su'aasha Labaad: ma taageersantahay in kacaan hubeysan uu ka billaaabmo Suuriya sida ka dhacday Liibiya?

JAWAAB:

Jawaabka su'aasha koowaad waxana leeyahay:

sharci ahaan ma bannaana in gaal dagaal lagula jiro loo kaalmeysto gaal kale, daliilo sax ah oo sugan ayaa kusoo arooray in taasi aysan banaaneyn,   Caa'isha allaha ka raalli noqdeewaxaa laga wariyay in: "nin gaal ah uu doonay inuu raaco oo la duulo nabiga iyo saxaabadiisa, nabiga SCW waxa uu gaalkii waydiiyay: ma rumeysan tahay alle iyo rasuulkiisa? Ninkii waxa uu yiri: Maya, Nabiga waxa uuyiri: iska laabo anigu mushrik ma kaalmeysanayo". Waxaa wariyay Muslim.

Nabiga SCW waxaa u yimid nin wuxuuna ku yiri: rasuulkii allow dagaalka miyaan gala mise waan islaamaa? Nabigu waxa uu yiri: islaamka soo gal ka dibna dagaalka aad, ninkii wuu islaamay dagaalka ayuuna aaday kuna dhintay. Waxaa wariyay bukhaari.

Waxaa kaloo jira axaadiith badan oo isla macnahaas ku yimid, qofkii doonaya inuu mas'aladaas si fiican uga bogto, ha eego kitaabka al imaam xamuud ibnu cuqalaa al shacbi allaha u naxariistee oo cinwaankiisu yahay: **القول المختار في حكم الاستعانة بالكفار**

Xitaa kuwa banneeyay in gaalada la kaalmeysto waxa ay qabaan in la helo laba shardi, kan koowaad in muslimiintu ay tiro yaryihiin oo ay danta ku qasabtay iney gaalada kaalmeystaan, kan labaad oo ah in gaalada la kaalmeysanayo ay yihiin kuwa lagu kalsoon yahay oo aan laga cabsaneynin khayaanadooda.

Hadii labadaas shardi la waayo, ma bannaana in gaal la kaalmesto. Sidaasi waxaa soo guuriyay al imam abuu bakar al xaazami. kitaabkiisa **[al ictibaar fii alnaasikh wal mansuukh, bogga 219]**

Xitaa hadii shardiga koowaad laga helay dadka liibiya jooga oo u muuqda dad tiro yar oo dagaal kula jira dambiilaha qadaafi iyo ciidankiisa, shardiga labaad ayaa meesha ka maqan, Nato uma socoto iney dan muslimmin ka shaqeyso.

Jawaabta su'aasha labaad waxana leeyahay:

xalka ugu fiican iyo daawada ugu habboon ee xaalka walaalaheena Suuriya waa iney jihaad alle dartiis ku qaadaan dambiile Bashaar al asad iyo ciidankiisa, jihaadka iyo umada oo lagu booriyo jihaad ayaa la isaga celin karaa shartiisa sida uu alle weyne kitaabkiisa ku sheegay:

فَقَاتِلْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ لَا تُكَلَّفُ إِلَّا نَفْسَكَ وَحَرِّضِ الْمُؤْمِنِينَ عَسَى اللَّهُ أَنْ يَكُفَّ بَأْسَ الَّذِينَ كَفَرُوا وَاللَّهُ أَشَدُّ بَأْسًا وَأَشَدُّ تَنْكِيلًا

Talada aan siiyay walaalaheena reer Shaaam waxaan ku xusay risaalada cinwaankeedu ayhay **يا أهل الشام؛ إن العصمة في الحسام.** Halkaas kaga bogo.

Risaaladaas wax cusub kuma aanan sheegin ee waxaan ku qoray hadal mudan in la raaco oo lagu daydo, Xudeyfa allaha ka raali waxaa laga wariyay inuu nabiga SCW waydiiyay: “Nabi allow kheerkaan uu alle na siiyay shar kama dambeeyaa sidii uu shar uga horeeyay? Nabiga wuxuu yiri: haa, waxaan ku iri: maxaa looga badbaadi karaa shartaas? Nabiga wuxuu yiri: seyf ayaa looga nabad gali karaa”. Waxaa wariyay abuu daa’uud, axmad, alxaakim.

Risaaladaas waxaan ku xusay in: “nabad galyada oo la dhowro nafta oola xakameeyo loo dadaalo arrintaas in ay keeni karto in daalimka la rido shartiisana iyo tan gaaladana laga hortagi karo laakiin ma noqoneyso tallaabo mira dhasha oo ku habboon Suuriya oo uu joogo mujrim Bashaar al asad iyo Nuseyriyada.

Inaad is difaacdaan waa lama huraan, maxa ayeelay dhiigiina rakhiis maaha, dheel dheel inuu ku daato maaha, iskaba daa in caruutiina iyo haweenkiina iyo sharafkiina wax loo geesto ma bannaana reer shaamoow in gaaladaan ay ilmihiina iyo dumarkiina laayaan idinkana aydana far dhaqaajinin.

Al imaan al nawawi waxa uu yiri: “in dumarka la difaafo waa waajib khilaaf la’aan” **[bogga 5-6]**

Su’aasha 11aad: ka socoto muwaxxid billaahi

Kuwa ku dhintay kacaanada carabta ma waxey yeelanayaan axkaamta shahaadada aduun iyo aakhiro?

JAWAAB:

Allaha ku barakeeyo muwaxid, su’aashaada muhiimka ah. Qofka isagoo muwaxid ah ku dhinta kacaanada looga soo horjeedo madaxda murtadiinta, oo aan la imaanin wax islaamnimada buriya, sida dimuquraadiyada , qofkaas alle idankiis waa shahiid sida aan ka maleesaneyno, alle ayaa og waxa uu yahaye.

Cabdullaahi ibnu camar allaha ka raalli noqdee wuxuu nabiga SCW ka wariyay: qofkii la dilo isagoo maalkiisa difaacanaya waa shahiid, bukhaari iyo muslim ayaa wariyay. **[Fatxul baari, 5/152]**

Abuu daa'duud, axmad, tirmidi iyo nasaa'i waxa ay soo saareen in nabiga SCW uu yiri:

